

noqdeen, arrintaasna waxay u sug-naatay Ruuxii Eeba ka yaaba.

ذَلِكَ لِمَنْ خَشِيَ رَبِّهِ ﴿٨﴾

Suuraddu waxay Sheegi Xumaanta gaalada iyo inay Nabiga, Quraanka iyo xaqaba diidi xasad, kibir iyo xaq diidnimo, hase-yeeshee Diintu iyo wanaaggeeduba waa cadyihiin sida Maalintoo kale, Dadkuna waa Laba, Mu'min khayr badan oo Janna gali, iyo Gaal shar badan iyo xumaan oo Naar gali (Eeba ha naga koriye).

Nabiguna wuxuu yidhi «Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yele» «Yahuudi waxay u kala Tagtay kow iyo Toddobaatan Qaybood, nasaarana waxay u kala Tageen laba iyo Toddobaatan qaybood, ummaddanna waxay u kala tagi saddex iyo Toddobaatan qaybood, Dhammaanna naartay gali mid mooeyeene» Waxay dheheen: Waa tee Rasuulkii Eebow? Wuxuu Yidhi: «Waa tan ku socota saan Nahay ani iyo Asxaabtayda». Al-Bayyinah (1-8).



Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariiss guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Marka DHulka la gilgilo.
2. Dhulkuna soo bixiyo culayskiisii (wixii ku aasnaa).
3. Dadkuna (Gaaladuna) dhahaan maxay leedayah.
4. Maalintaas waxay ka sheekayn warkeeda.
5. Maxaayeelay Eebaa u waxyooday.
6. Maalintaas Dadku way soo bixi iyagoo kala tagsan (xagga Diinta iyo Camalkaba) si ay u arkaan camalkooda.
7. Ruuxiise wax yaroo khayra fala wuu arki.
8. Kiise wax yar oo shar ah fala wuu arki.

إِذَا ذَرَيْتَ الْأَرْضَ زَلَّا مَا ﴿١﴾
وَأَخْرَجْتَ الْأَرْضَ أَثْقَالَهَا ﴿٢﴾

وَقَالَ إِلَيْكُمْ مَا لَهَا ﴿٣﴾
يَوْمَئِذٍ تُحَدِّثُ أَخْبَارَهَا ﴿٤﴾

يَا أَنَّ رَبَّكَ أَوْحَى لَهَا ﴿٥﴾
يَوْمَئِذٍ يَصْدُرُ النَّاسُ أَشْنَانًا ﴿٦﴾
يُرَوُا أَعْمَلَهُمْ ﴿٧﴾

فَمَنْ يَعْمَلْ مِنْ كُلِّ دَرَةٍ حَيْرَاءٌ رُّهْمٌ ﴿٨﴾
وَمَنْ يَعْمَلْ مِنْ كُلِّ دَرَةٍ شَرَّاءٌ رُّهْمٌ ﴿٩﴾

Qiyaamadu waa xaq sugan si Ruux walba looga abaal mariyo Camalkiisa, khayr Ruuxii fala wuu la kulmi, xumaan yar Ruuxii sameeyana wuu arki. Ruux walbana suu ka Diin yeesho yaa lugu abaal marin. Abuu-Hurayra waxaa laga wariyay inuu yidhi: Rasuulkii Eebe «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee» yaa akhriiyay Aayaddan: (Maalintaas waxay ka sheekayn warkeeda) Wuxuuna yidhi: «Ma ogthihiin warkeeda?» waxay dheheen Eebe iyo Rasuulkisaa og, wuxuu yidhi: «Warkeedu waa inay ku marag kacdo Addoon kastaba wuxuu ku camal falay kor-keeda, iyadoo dihi; wuxuu camal falay sidaa iyo sidaa, Maalin hebla iyo Maalin hebla, warkeedu wakaas». Waxaa wariyay Axmad iyo Tirmidi iyo Nasaa'i; Az-Zalzalah (1-8).